

DEGMADA SAN DIEGO

Adeegyada Caafimaadka Dhaqanka (Qorshaha)

Haddii aad walaac ka qabto adeegyada caafimaadkaaga maskaxda ama adeegyada cilladda isticmaalka maandooriyaha,
Caawimaad ayaa la heli karaa!

Maadaama aad macmiil ka tahay Qorshaha, waxaad xaq u leedahay inaad hesho adeegyada caafimaadka dhaqanka oo tayo leh iyo waxa aad xaq u leedahay inaad ka hadasho walaacaaga ku aadan qayb kasta oo ka mid ah adeegyadaada daawaynta.

SIYAABAHA LOO XALLIN KARO WALAACAAGA:

- Habka ugu fudud uguna dhakhsaha badan ee wax looga qaban karo arrinka waa inaad la hadasho adeeg bixiyahaaga ama maamulaha barnaamijka.
- Haddii aadan ku qanacsanayn daawayntaada, waxaad waydiisan kartaa ra'yi labaad oo laga helo dhakhtar kale oo jooga barnaamijkaaga daawaynta ama adigoo wacaya khadka **helitaanka iyo dhibaatooyinka 1-888-724-7240 (TTY: 711)**.
- Waxaad Geedi-socodka Xallinta Dhibaatooyinka Macaamilka iyo Ka faa'iidaystayaasha u isticmaali kartaa:
 - Inaad gudbisyo cabasho wakhti kasta haddii aadan ku qanacsanayn adeegyada ama aad dareento in xuquuqdaada la diiday.
 - Ku gudbi racfaan **60 maalmood** gudahooda haddii adeegyadaada la joojiyo, la dhimo, ama la diido.
 - Gudbi racfaanka la dedejiyo, haddii nidaamka caadiga ah uu si dhab ah uu khatar u gelin karo noloshu, caafimaadka, ama awoodda lagu gaari karo, lagu ilaalin karo ama dib loogu soo celin karo awaadda shaqada ee ugu badan.
 - Sii wado helitaanka adeegyadaada inta aad sugayso go'aanka racfaanka.

Dib u eeg Buug-yaraha Cabashada iyo Racfaanka (oo laga heli karo barnaamijkaaga daawaynta) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo tilmaamo ku saabsan sida loo gudbiyo cabashada ama racfaanka hadal ahaan iyadoo la isticmaalayo telefoon, qof ahaan, ama qoraal ahaan.

Foomamka Cabashada iyo Racfaanka oo wata baqshado shaabadaysan ayaa laga heli karaa xafiiska bixiyaha daawayntaada.

XAQUUQAHAAGA KA MACAAMIIL AHAAN

- In laguula dhaqmo si xushmad leh oo aad daaweynta ku hesho luqadda aad doorbidayso.
- Inaad hesho ra'yi labaad oo ku saabsan daaweyntaada ama daawadaada.
- Inaad doorato qof ku matalo adiga.
- Inaad qof la timaado shirarka iyo dhageysiyada.
- Inaad qoyska, asxaabta, ama u doodaha ka hesho caawimaad la xiriirta gudbinta cabasho ama racfaan .
- Inaad xor ka ahaato takoorid ama ganaax maadaama aad gudbisay cabashada/ racfaanka.
- In sharciga uu ilaaliyo qarsoodnimadaada.

XAQA AAD U LEEDAHAY DHAGAYSIGA GOBOLKA EE CADDALAD AH

Haddii aadan ku qanacsanayn natiijada Hannaanka Racfaanka Qorshaha, waxaad xaq u leedahay inaad Dhegeysiga Gobolka ee Cadaalad ah ku codsato **120 maalmood** gudahooda laga bilaabo wakhtiga go'aanka racfaanka.

Haddii aad tahay ka-faa'iideyste Medi-Cal oo aad martay hannaanka Cabashada iyo Racfaanka Qorshaha, waxaad xaq u leedahay inaad codsato Dhegeysiga Gobolka ee Caddaalad ah kaas oo ku saabsan diidmada, joojinta, ama dhimista adeegyada **120 maalmood** gudahooda ee tallaabadaas.

Si aad u sii haysato gunnooyinkaaga/adeegyada aad hesho inta racfaankaagu weli socdo, waa inaad codsi ku gudbisaa **10 maalmood** gudahooda laga bilaabo markaad hesho Ogaysiiska Go'aaminta Gunnooyinka Xaaladaha Xun (Aid Paid Pending).

Waxaad si toos ah u wici kartaa **Waaxda Adeegyada Bulshada 1-800-952-5253** AMA wac mid ka mid ah wakaaladaha hoos ku qoran.

WAKAALADAHAN WAXAY KAA CAAWIN KARAAN CABASHOYINKAAGA

Wixii la xiriira adeegyada **BUKAAN-JIIFKA/DEGANAANSHAHA**, wac:
U doodista Bukaanka JFS

619-282-1134 ama 1-800-479-2233

Wixii la xiriira adeegyada **BUKAAN-SOCODKA: Xarunta Macmiilka ee Barashada Caafimaadka & U doodista (CCHEA)**

1-877-734-3258